

ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: U WAREEGIDA KULLIYADA

Waxaa lagu aqbalay kulliyada aad jeclaan lahayd inaad dhigato, laakiin tallaabooyin badan ayaa la qaadayaa ka hor inta aanad bilaabin fasalda.

TALLAABOYINKA 4-SANDO KULLIYADAHA:

1. Bixi kharashkaaga xaqiijinta ardayga cusub/diiwaangelinta.

Haddii aanad awoodin inaad bixiso **kharashka**, la xidhiidh **xafiiskaaga qaabilaada** oo waydii inay dib u dhigaan deebaajigaaga.

2. Ka codso **qoraalada buundooyinka rasmiga ah** dugsigaagii sare iyo kulliyad kasta oo aad buundooyin ka heshay. U dir qoraalada buundooyinka kulliyadaada sida ugu dhakhsaha badan ee u dambaysa darajooyinka waa la soo geliyay.

TALLAABOYINKA 2-SANDO KULLIYADAHA:

1. **Gudbi** wixii ah foomamka iyo **kaalmada dhaqaale ee kale ee la codsaday** muddada loo qabtay.

2. **Dhamaystir** tallaabooyinka meelaynta xisaabta iyo **Ingiriisiga** ee kulliyadaada.

GURIYAYNTA

Guriyanta jaamacada waxaa ku jiri kara hoolalka la dego, qaybaha dabaqyada ama guryaha. Codsi inaad xarunta (xaramka) jaamaca ku noolaado oo hubso inaad bixiso deebaajiga guriyayntaada muddada loo qabto. La xidhiidh xafiiska guriyaynta wixii ah su'aalo kasta.

Guriyaynta jaamacada ka baxsan doorashooyinka waxa ku jira ku noolaanshaha guriga, kiraysashada qayb dabaq ah/guri ama ku noolaanta guryaha walaalnimada iyo hablaha wada dega.

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN SAMEEYO KA HOR INTA AANAD BILAABIN KULLIYADA?

- Xaqiiji aqbaladaada** addoo soo gudbinaya caddayntaada diiwaangelinta iyo deebaajigada Maayo 1 ama muddada ay u qabatay kulliyadaadu.
- Aqbal abaalmarintaada kaalmada dhaqaale.**
- Qorshayso taladaada iyo tababarka** ballamaha.
- Codsashada guriyaynta** haddii aad dooranayso inaad ku noolaato **aaga jaamacada.**
- Soo gudbi diiwaanadaada tallaalka.** Ka hel diiwaanadan dhakhtarkaaga ama dugsiga degmadda.
- Haddii aad u qalanto, **ku biir barnaamijyada taageerada ardayga** (waa loola jeedaa TRIO, EOP, CAMP) kaa caawin doona **la talinta tacliinta**, kharashka waxbarashada, kaalmada dhaqaale, iwm.
- Isku diiwaan geli fasalada.**

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Haddii aad ku jirto kulliyada bulshadda ama farasamada oo 2 sano ah oo aad qorshaynayso kulliyad 4 sano ah mustaqbalka, la hadal la taliyahaaga wax ku saabsan koorsooyinka la qaadanayo. **Dhammaan duruusta 2-da sano uma wada wareegaan kulliyadaha 4-ta sano ah.**

MAXAY TAHAY JIHAYNTU?

Kuuliyadaha badankoodu waxay u baahanyihiin ardayda cusub inay soo xaadiraan tababarka jihaynta, halka ay ku bartaan wax ku saabsan **xarunta kulliyada** goobaha, isku diiwaangelinta fasalada iyo la kullanka filka. Qaar ka mid ah jihaynta kulliyadaha waa qof ahaan kuwa kalana waa onlayn. U kaalay qof ahaan tababarka jihaynta haddii aad karto! Waxaa lagugu marti qaadi karaa inaad soo xaadirto barnaamijka wareejinta xagaaga ee xooga saaraya u diyaar garayntaada saddexdaada bilow ee u horeeya.

ABRIIL: FASALKA 12